miljöpartiet de gröna
LUDVIKA

# Bayaanka doorashada ee Ludvika 2022-2026

**Xisbiga Miljöpartiet ayaa raba in degmada Ludvika ay noqoto mid ku dayasho mudan marka ay timaaddo kala guurka deegaanka si loo helo adduun waara. Qalalaasaha cimilada iyo dabar goynta lixaad ee baahsani ee adduunka waxa ay saamaynaysaa qof walba. Bulshadu waa in ay tan ula kulantaa cabbirro heerar kala duwan ah. Siyaasadda xisbiga Miljöpartiet waxa ay ku salaysan tahay sii jiritaan deegaan, bulsho iyo dhaqaale.**

## Ludvika waarta - waxa ay kordhinaysaa diyaargarowga.

Sii daynta gaaska aqalka dhirta lagu koriyo iyo luminta kala duwanaanshiyaha noolaha ayaa ah labada khataraha ugu weyn ee nolosha wanaagsan nagu haya bini'aadamka. Si caqabadahaas aan uga gudubno, waxa aan u baahannahay in aan si ka hortag ah u shaqeyno oo aan bulshada uga qalabeyno khataraha aan la iska ilaalin karin.

Annagu waxa aannu rabnaa in aan aragno unugyo qorraxda oo badan ee guryaha dowladda hoose ay leedahay, iyo wax soo saarka tamarta ee noo gaar ah waxaan sidoo kale helnaa adkeysi weyn haddii ay dhacdo dhibaatooyin. Soo saarista koronto ee maxaliga ah, waxaan hubineynaa shidaalka baabuurta korontada.

Si loo wajaho luminta kala duwanaanshiyaha noolaha, waxaa loo baahan yahay in aan xoojino aqoonta degmada ee meelahaas ku saabsan. Tusaale ahaan, waxaa loo baahan yahay tallaabooyin dheeraad ah oo ka dhan ah noocyada soo duulayaasha, xeeladaha lagu door bidayo cayayaanka bacrinta iyo ilaalinta rabbaaniyadda noole ahaan ee qiimaha leh. Isticmaalka dhirta iyo tamarta biyaha laga dhaliyo sidaas oo kale waxa ay u baahan yihiin in la horumariyo iyada oo si weyn loo tixgalinayo noolaha. Marka laga hadlayo kaymaha degmada, waxaa sidaas oo kale loo baahan yahay in diiradda la saaro qiimaha madadaalada ee kaynta, waxaana loo baahan yahay rabbaaniya ilaalin badan. Annagu waxa aannu horeyba u ognahay in shirkadaha beeralayda ah ay ku qasban yihiin in ay wax ku iibsadaan bacrinta si ay u helaan dalag wanaagsan. Dhammaan hawlaha degmadu waxa ay u baahan yihiin in laga eego jawiga deegaanka iyo cimilada.

Ludvika annagu waxa aanu rabnaa

- Maalgelinta tamarta la cusboonaysiin karo iyo waxtarka tamarta
- dib u soo celi booskii cilmiga deegaanka ee degmada
- U samee miisaaniyada kaarboon dayogsiidh ee degmada Ludvika
- kala duwanaanshaha noole oo sugan.
- Qaado tillaabooyin si ay degmadu si fiican ugu adkaysato cimilada xun
- In laga ilaaliyo dhul beereedka dhiig miiratada
- In la xoojiyo amniga IT-ga degmada
- waxa ay yareeyaan saamaynta cimilada cuntada iyo kordhinta iibsashada cuntada rabbaaniga ah iyo kuwa gudaha laga beero
- lahaadaan qorshaynta bulshada ee cimilo-macaan

## Dugsiga barbaarinta iyo dusiyada

Dugsiga hoose dhexe ee Ludvika ayaa muddo dheer ka fogaaday in uu gaaro himilooyinka sare ee golaha degaanku uu u dejiyay wixii ku saabsan dugsiga. Dugsiga maanta waxa haysta in badan oo macalimiin ah oo ay hooseyso tayadooda macalinimo, qaar baddana waxa ay ku tilmaamaan jawiga dugsigu in uu yahay mid qas ku ah ubadka iyo mid karkabo ku haya macalimiinta. Ilo badan ayaa loo baahan yahay si loo daboolo carruurta baahiyaha gaarka ah qaba iyo carruurta aan hadda awoodin in ay aadaan dugsiga. Macallimiinta, waqti badan ayaa looga baahan yahay hawsha asaasiga ah iyo in ay helaan mushahar loo arko in ay yihiin awood fallisaad.

Dugsiyada barbaarinta, waxaa muddo dheer ka jiray qaylo dhaan ku saabsan cawaaqibka ka iman kara kooxaha tirada badan ee carruurta. Halkan, shaqo wakhti dheer ah ayaa loo baahan yahay si loo helo kooxo yaryar oo caruur ah iyo jawi shaqo oo sii waaraya oo shaqaalaha ah.

Annagu waxa aannu sidaas oo kale rabnaa in la helo meel aan wax ku iibsanno agabka waxbarashada dhaqameed si ay u dhammaystiraan kuwa dhijitaalka ah.

Gudaha Ludvika annagu waxa aannu rabnaa

- In la yareeyo kooxaha carruurta dhigata dugsiga barbaarinta
- In badan oo la geliso caawimada waxbarid dhaqameedka si ay u kabto kuwa dhijitaalka ah
- In la xoojiyo soo jiidashada mihnadda macallinimada iyadoo loo marayo mushahar wanaagsan iyo jawi shaqo oo wanaagsan
- Si ka hortag ah oo looga shaqeeyo iyada oo la maalgelinaya waxqabadyada xilli hore ee carruurta baahiyaha gaarka ah qaba
- in laga shaqeeyo in aan loo dulqaadan xadgudubyada Sharaf dilka gudaha dugsiga
- in la arko maalgashi gaar ah oo lagu sameeyo fadhiyayaasha guriga iyo carruurta kale ee baahiyaha gaarka ah qaba.
- In la kordhiyo ciyaaraha iyo dhaqdhaqaaqa jirka ee dugsiga si kor loogu qaado natiijooyinka daraasadda iyo caafimaadka dadweynaha
- in ay caruur iyo dhalinyaro badan ay si badbaado leh u tagi karaan dugsiga iyo hawlaha firaaqada

## Degmo wanaagsan oo la degi karo oo laguna noolaan karo

Ludvika waxa eey lee dahay wax badan oo lagu casuumi karo, degmada waxa eey lee dahay deegaan rabbaani ah oo cajiib ah. Kuwa ah ururada qaniga ku ah arrimaha jamciyadaha wax ay bixiyaan hawlo kala duwan oo hodan ah. Ludvika waxa ay leedahay dad xididdo ku leh meelo badan oo adduunka ah , dabeecadda caalamiga ahna waa wax ay tahay in aannu anagu ku faano oo si wanaagsan u maareyno.

Annagu waxa aannu aaminsanahay in ay jiraan wax badan oo laga faa'iidaysan karo in aan ka dhigno deegaankeena rabbaaniga ah mid muuqda oo la heli karo, tusaale ahaan in aan dhisno qolal habeen dhixid ah, la horumarinta anaga biyahenna kalluumeysiga, habeynta waddooyinka baaskiilka, waddooyinka socodka iyo meelaha hilibka lagu sosho. Waxay ka dhigi kartaa Ludvika mid soo jiidasho leh degmo dalxiis ahaan. Deegaannada ku xeeran guryahayaga daryeelka waxay u baahan yihiin in la horumariyo, tusaale ahaan iyada oo la beerayo iyo qaybaha xoolaha nool.

Gudaha bulshada wanaagsan waxa ay dhammaan dadka qaangaarka ah u baahan yihiin in ay helaan fursad shaqo oo macno leh, si aan u jebinno bannaan ka joogidda muddada dheer ee qaar badan oo ka mid ah ay ku suganyihiin. Talaabada ugu horeysa, waxa annagu aannu rabnaa in degmadu ay isku qabato daryeelka shakhsi ahaaneed iyo qoyska iyo qaybta suuqa shaqada si loo kordhiyo awoodda waxqabad ee degmada. Sannadaha soo socda ee dhaqaale ahaan ay adag tahay, degmadu waxa ay u baahan tahay in ay diiradda saarto hawlaha asaasiga ah sida dugsiyada, daryeelka iyo deegaanka. Sidaas darteed annagu waxa annu doonaynaa in aannu aragno wada shaqayn horumarsan oo aannu la yeelano dawladaha hoose ee aynu deriska nahay.

Gudaha Ludvika annagu waxa aannu rabnaa

- in la horumarinta Ludvika sidii looga dhigi lahaa degmo dibaadda kusoo hawa qaadata ah iyo meel loo soo dalxiis tago
- In la horumariyo deegaanka ku hareeraysan guryaha dadka lagu xanaaneeyo ee degmada
- in dhammaan dadka waaweyni ay xaq u leeyihiin in ay helaan shaqo macno leh iyo in la jebiyo bannaan ka joogista muddada dheer
- Ka shaqaynta kordhinta shaqaalaha aasaasiga ah ee daryeelka
- Degmadu waxa ay u baahan tahay in ay diiradda saarto hawlaheeda asaasiga ah, oo ay wanaajiso jawiga shaqada ee meelaha uu fasaxa bukaanku ku badan yahay.